# DSHS Notice of Privacy Practices for Client Medical Information (Wargelinta Nidaamka Sirta DSHS ee Macluumaadka Caafimaadka Macmiilka)

**Laga bilaabo Noofember 1, 2024**

DSHS waa inay kugu wargelisaa xuquuqdaada sirta ee Health Insurance Portability and Accountability Act (Sharciga Isla Xisaabtanka iyo La Wareega ee Caymiska Caafimaadka, HIPAA). (45 CFR §164.520). DSHS waa "hay'ad isku dhaf ah." Dhamaan DSHS ma wada khuseeyo HIPAA, kaliya barnaamijyada ugu qoran websaytka DSHS Qaybta Daryeelka caafimaadka ayay khusaysaa HIPAA. Wargelintan kaliya waxay khusaysaa macaamiisha ay u adeegaan barnaamijyadaasi. Ogeysiiskani ma saameynayo u qalmitaankaaga adeegyada DSHS.

**Wargelintan waxa uu sharaxaa sida macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan loo isticmaali karo oo loo bixin karo iyo sida aad u heli karto macluumaadkan. Fadlan dib ugu fiiri si taxadir leh.**

**Waa maxay PHI?**

Protected Health Information (Macluumaadka Caafimaadka La Ilaaliyay, PHI) waxaa weeye macluumaadka caafimaadka macmiilka oo loo hayo isaga oo qayb ka ah DSHS oo hoos yimaada HIPAA. PHI waxaa weeye macluumaad caafimaad oo kula xidhiidha oo ku saabsan xaaladaada caafimaadka, daryeelka caafimaadka ee aad qaadato, ama lacagta aad ku bixiso daryeelkaaga caafimaadka. DSHS waa inay ilaaliso PHI-gaaga sida uu dhigayo sharcigu.

**PHI sidee ah ayay DSHS iga haysaa?**

Si ay nooca caawiso adeega aanu ku siinayno, waxa loo baahan karaa inaad na siiso macluumaadka caafimaadka oo ay ku jiraan goobtaada, macluumaadkaaga caafimaadka, ama duwaanadaada caafimaadka. Waxa aan sidoo kale heli karnaa PHI adiga kugu saabsan oo ilo kale laga heley oo loogu baahan karan si aanu kuugu adeegno ama aanu u bixino daryeelkaaga caafimaadka.

**Waa arka PHI-gayga?**

Waxa aanu kaliya isticmaalnaa xadi yar oo PHI ah oo aanu ugu baahan nahay si aanu u qabano shaqooyinkeena. Waxa aanu la wadaagi karnaa PHI barnaamijyada kale ama dadka kale hadii uu ogol yahay sharcigu ama hadii aad ogolshahay. Tusaale ahaan, PHI-gaaga waxaa la siin karaa oo isticmaali kara Health Care Authority (Maamulka Daryeelka Caafimaadka) iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaad ee kale si ay iskugu duba ridaan oo ay u bixiyaan kharashka daryeelkaaga caafimaad. Waxa aanu biixn karnaa PHI-ga hore, wakhtigan ama mustaqbalka.

**PHI sidee ayay DSHS bixisaa?**

Waxa aanu kaliya la wadaagnaa PHI-gaaga dadka kale ee ugu baahan inay shaqada ku qabsadaan, sida uu ogol yahay sharcigu. Waxa aad dalban kartaa liiska cida DSHS la wadaagtay PHI-gaaga wixii ah ujeedooyinka qaar lixdii bilood ee lasoo dhaafay.

**PHI sidee ah ayay DSHS bixisaa?**

Waxa aanu u bixiyaa PHI "sida loogu baahdo" si aanu iskugu duba ridno adeegyada iyo wixii daawayn ah, lacag bixinta, iyo hawlaga daryeelka caafimaadka. Tusaale ahaan, waxa aanu bixin karnaa macluumaadka:

- In uu bixiyahaa daryeelka caafimaadku uu ku siiyo daawayn caafimaad iyo maamulida kiiska.
- Dhinaca ka masuulka ah bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka si loo diyaariyo lacagta.
- Si loo eego hadii aad u qalanto barnaamijyada DSHS.
- Si loo taageero shaqooyinkeena, sida in la go'aamiyo hadii aad daryeelka aad ka heleysaa bixiyuhu uu buuxiyay shuruudaha sharci. Hawlahan waxaa kamid noqon kara xogta la isku keeney, hawlaha maamulida khatarta, iyo hantidhawrka.

**Goorma ayaa DSHS ay bixin kartaa PHI-gayga bilaa ogolaanshahayga?**

Marka laga tago u bixinta daawayn, lacagta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, DSHS waxay u bixin kartaa PHI-ga bilaa ogolaanshahaaga sababo kale qaar. Sharciyan, waxaa nagu waajib noqon karta ama uu noo ogolaan karaa in aanu bixiyo PHI-gaaga. Waxoogaa tusaalayaala ayaa ah oo loogu baahan karo:

- In la liiso macluumaadkaaga caafimaadka asxaabtaa ama xubin qoyskaaga ah oo ku lug leh daryeelkaaga. Waxa aad xaq u leedahay in aad diido bixintan. Hadii aad diido, ma siin doono xubinta qoyskaaga ama saaxiibkaa.
- Ula wadaagista maamulada caafimaadka shacabka wixii hawlaha caafimaadka shacabka sida kahortaga ama xakamaynta xanuun ama dhaawac ama ka warbixinta dhalashada iyo dhimashada.
- Gaadhsiin dhacdooyin tacadi ama dayacaad ilme ama ruux wayn ama tacadiga guriga dhaxdiisa Child Protective Services (Adeegyada Ilaalinta Ilmaha), Adult Protective Services (Adeegyada Ilaalinta Dadka Waawayn), bilayska, ama hay'ado kale.
- U bixinta duwaanada amar maxkamadeed, yeedhmo, dalabka baadhitaan, ama wixii kale ee dacwad sharci ah, ama dacwad maxkamadeed iyo maamul ah.
- La wadaagista PHI hay'ada kormeerka ee siisa liisanka xirfadlayaasha caafimaadka iyo liisanka ee kormeera xarumaha caafimaadka, sida guryaha kaaliyayaasha caafimaadka iyo isbitaalada.
- La wadaagista PHI hay'adaha federalka iyo gobolka si ay kuu daryeelaan, hadii loogu baahdo in la ogaado u qalankaaga adeegyada ama gunooyinka, ama sida uu dhigayo sharcigu.
- In la siiyo PHI koriyaha ama waalidka ilmaha yar.
- In loo bixiyo PHI kahortaga ama yaraynta khatar daran oo degdega ah oo caafimaad ama amaanka ruux ama shacabka ku ah.
- In lala wadaago PHI saraakiisha bilayska qaar.
- U bixinta PHI daraasada, wixii mashruuc daraasadeed ee la ansixiyay, marka sirtaada la ilaaliyay.
- La wadaagista maamulka ciidanka, xaaladaha qaar, hadii aad ku jirto colaad hubaysan ama dagaal.
- In PHI la siiyo hay'adaha Gunada Shaqaalaha.
- U isticmaalka ama u bixinta PHI hadii ay jirto xaalad degdega ah ama u bixinta wixii ujeedo samato bixinta masiibo.
- Kadib marka aad dhimato, in lala wadaago PHI-gaaga wakiilada shaqaalaha hantidaada, dhakhtarka baadha maydka, maamulka xarumaha aaska, ama hay'adaha unugyada la bedelo qaada.
- Marka uu ogol yahay ama uu waajibinayo sharcigu

**Duwaanada Daaweynta Balwadaha.**

Ma bixin doono substance use disorder (duwaanada daawaynta balwadaha, SUD) iyada oo aanu ogolaanshe kaa hayno moojee, ama hadii uu ogol yahay moojee sharciga 42 C.F.R. Qaybta 2 (Qaybta 2.). Hadii aanu ku helno duwaanaada Qaybta 2 cid kale, sida bixiyaha SUD, waxa aanu bixin karnaa duwaanadaada hadii uu ogol yahay HIPAA. Laakiin, uma bixin doono duwaanada SUD wixii dacwad madani, danbi, maamul iyo sharci ah ee adiga lagugu soo oogo, iyada oo aad qoraal ku ogolaatay moojee, ama lagaga jawaabayo amar maxkamadeed.

**Dib u Bedelinta Duwaanada Daryeelka Caafimaad**

Ma isticmaali ama bixin doono PHI-kaaga (1) si aanu u samayso baadhitaan madani, danbi ama maamul ama (2) loo soo rogo ganaax danbi, madani, ama maamul, loo doono, helo, bixiyo, ama loo gududeeyo daryeelka caafimaadka, hadii daryeelka caafimaad uu yahay sharci meeshii lagu ansixiyay. Tusaale ahaan, ma siin doono PHI-gaaga bilayska gobol kale oo baadhitaan ku wada adeegyada daryeelka caafimaadka taranka ee sharciga ka ah gobolka Washington.

Hadii duwaanadaada adeegyada daryeelka caafimaadka taranku loogu baahan yahay hawlaha kormeerka caafimaadka, dacwad maxkamadeed ama maamulka, wixii ujeedo bilays ah, ama in la siiyo dhakhtarka baadha maydka, ama shaybaadhada maydka, ma siin doono duwaanada iyada oo ay na siiyaan moojee bayaan qoraal ah oo dhigaya inayna u isticmaali doono duwaanada baadhitaan ama inay kusoo rogaan ganaaxyo sharci daro ah adeegyada daryeelka caafimaadka taranka. Tusaale ahaan, lama wadaagi doono duwaanaada caafimaadka bilayska ama dhakhtarka baadha maydka iyada oo ay xaqiijiyaan moojee in ayna u isticmaali doonin duwaanada si loo baadho ama loosoo rogo ciqaabo sharci oo adeegyada daryeelka caafimaadka taranka ah.

**Sidee ayay noqonaysaa hadii aad doonayo in cid kale la siiyo PHI-kayga?**

Wadaagista qaar aan ku qornayn wargelintan waxay u baahan yihiin ogolaanshahaaga. Uma isticmaali karno PHI-gaaga suuq qayb ama iibin PHI-kaaga iyada oo aan lagaa haynin ogolaanshe qoraal ah. Waxaa lagaa dalban doonaa inaad saxeexdo foomka ogolaanshaha ah si aan noogu sheegno in aanu u bixiyo PHI-gaaga hadii:

- Aanu u baahanahay ogolaanshahaaga si aanu u bixiyo adeegyada ama daryeelka;
- Aanu u baahanahay ogolaanshahaaga si aanu u bixino qoraalada dhakhtarka cilmi nafsiga ah;
- Aad naga doonayso in aanu u dirno PHI-gaaga hay'ado kale ama bixiyayaal kale wixii sabab ah ee aanu sharcigu ogolayn bilaa ogolaanshahaaga; ama
- Waxa aad doonaysaa in PHI-kaaga loo diro ruux kale, sida looyarkaaga, qaraabadaa, ama wakiil kale.

Ogolaanshahaaga wadaagista PHI-kaagu waxa u shaqaynayaa ilaa dhamaadka taariikhda aad ku qortay foomka. Waxa aanu kaliya la wadaagi kartaa PHI-kaaga cida aad qortay. Waxa aad joojin kartaa ama bedeli kartaa ogolaanshaha isaga oo qoraal ah oo aad u dirayso DSHS.

**Ma arki karaa PHI-kayga?**

Waad arki kartaa PHI-kaaga, isaga oo ah foom daabacan ama elektoroonig ah. Hadii aad dalbato, waxa aad heli kartaa nuqulka PHI-gaaga. DSHS waxay ka qaadi kartaa kharash macquul ah oo koobiyaynta ah.

**Ma heli karaa liiska dadka la siiyay PHI-gayga?**

Waxa aad xaq u leedahay liiska, ee cida la siiyay PHI-gaaga lixdii sano ee lasoo dhaafay, marka laga tago wixii loo bixiyay daawayn, lacag bixin, shaqooyinka, ama wixii aad ogolaatay in la siiyo. Haddii aad codsatid wax kabadan hal xisaabaad mudo kamida 12 bilood, DSHS waxay kaa qaadi kartaa khidmad lacageed oo macquula.

**Ma bedeli karaa PH-kayga?**

Hadii aad u aragto in PHI-kaagu uu khaldan yahay, waxa aad iyada oo qoraal ah naga dalban kartaa in aanu bedelno ama ku darto PHI cusub.

Waxa aanu tixgelin doonaa dalabka laakiin khasab naguma aha in aanu ogolaano. Waxaad sidoo kale naga dalban kartaa in aanu u dirno wixii isbedelo cid kale oo haysata nuqulada PHI-gaaga.

**Ma xadidi karaa tirada bixinta PHI-kayga iyo sida aan u heli karo?**

Waxa aad nagaga dalban kartaa si qoraal ah xadidaada isticmaalka iyo bixinta PHI-kaaga, laakiin waxaa dhici karta in aanaan ogolaanin. Waxa aad sidoo kale dalban kartaa in aanu kugu siino qaab ama goob kale PHI-kaaga.

**Waa maxay jabsashadu?**

Jabsashadu waxaa weeye isticmaalka ama bixinta PHI-kaaga oo aanu ogolayn HIPAA, waxaa kamid ah xatooyada, khaladka ama jabsashada. Waxaanu kugula socodsiin doonaa boosta hadii wax jabsashado ah ay dhacdo PHI-gaaga sida uu dhigayo HIPAA.

**Ma heli karaa nuqulka ogeysiiskan asturnaanta ah?**

Haa. Wargelintan sirta ah adiga ayaa iska leh oo waad haysan kartaa. Hadii aan ku helo elektoroonig ahaan wargelintan, waxa aad dalban kartaa nuqul waraaqo ah, oo waanu ku siin doonaa.

**Sidee ayay wax noqonaysaa hadii uu is bedelo nidaamyada sirtu?**

Waxaa kugu waajib ah inaad u hogaansanto wargelintan. Waxa aad xaq u leedahay inaad bedesho wargelintan. Hadii shuruucda ama nidaamyada sirtu ay isbedelaan, waxa aanu cusboonaysiin doonaa wargelintan oo waxa aanu kuu soo diri doonaa nuqulka ama waxa aanu kuu soo diri doonaa macluumaadka ku saabsan wargelinta cusub iyo halka aad ka heleyso.

**Yaan la xidhiidhayaa hadii aan qabo su'aalo ku saabsan wargelintan ama xuquuqdayda PHI-gayga?**

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan wargelintan, waxa aad kala xidhiidhi karta Sarkaalka Sirta DSHS DSHSPrivacyOfficer@dshs.wa.gov ama (360) 902-8278.

**Sidee ayaan uga warbixinayaa xad gudubka xuquuqdayda sirta PHI?**

Hadii aadu aragto in xuquuqahaaga asturnaanta la burburiyey waxa aad cabasho ka xarayn kartaa:

Sarkaalka Sirta DSHS, Department of Social and Health Services, PO Box 45135, Olympia WA 98504-5135 ama iimeel ahaan DSHSPrivacyOfficer@dshs.wa.gov. Hadii aad xarayso cabasho, DSHS ma bedeli doonto ama joojin doono adeegyadaada oo waa in aan lagaaga aar goosan.

**AMA**

Ku gudbi onleyn cabashadaada: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/cp/complaint_frontpage.jsf ama u dir iyada oo qoqraal ah: Office for Civil Rights, US Department of Health and Human Services, **200** Independence Avenue, S.W., Room 509F HHH Bldg., Washington, D.C. 20201, taleefanka (800) 368-1019. Wixii cabasho ah ee DHHS ah waa in lagu soo diraa 180 maalmood gudahood oo ka bilaabma xad gudubka sirta ee la sheegey.